

## **Heeganka dulmane dembi Caawin iyo talasiin dulmanayaasha**

### **Heeganka dulmane dembi (RIKU)**

RIKU ujeedadiisu waxaa weeye, inuu wax ka qabto xaalada dulmanaha dembi, isagoo u sameeynaaya adeegyo caawinaad oo fudud.

RIKU wuxuu siiyaa dulmanayaasha, ehelkooda iyo markhaatiyada caawin iyo talasiin. Adeega ujeedadiisu waxaa weeye in la caawiyo dadka loogu talagalay, si eey uga soo kabsadaan, iyo in la hubiyo sideey xaquuqdooda u heli lahaayeen. Adeegu wuxuu ku saleysanyahay intabadan shaqo iskaa wax u qabso ah, oo si xirfadeysan loo hagay.

Waxaan qadarinaa xaquuqdaada go aan gaarida, waxaanu ilaalinaa sirta. Dhammaan adeegayagu waa mid lacag la aan ah (marka laga reebo khadka telefoonka).

### **Adeega RIKU adigaa ayaalagu talagalay, hadii**

- aad tahay dulmane dembi ama aad ka shakido in aa tahay dulmane dembi
- Qof ehelkaaga uu noqday dulmane dembi
- aad tahay markhaati dembi
- aad doneysid in aad ka hadasho dembi ku qabsaday

Waxaad nagala soo xiriiri kartaa telefoonka ama farriin e-mail ayaad noo soo diri kartaa, ama waqti gaar ah ayaad naga qabsan kartaa. Hadii aad doontidna, magac la aan ayaad nagula soo xiriiri kartaa.

### **CAAWIN SHAQSIYADEED**

Hadii loo baahdo waxaa RIKU laga heli karaa caawiye kuu gaar ah, kaasoo kuu raaci kara wareysiga booliska iyo maxkamada. Wuxuu kaloo kaa caawin karaa hadii aad dalbaneysid, diidmo u soo dhawaansho ama magdhow. Caawiyahaaga ayaad kala hadli kartaa waxyaabaha kugu dhacay iyo suuragalka tallaabada xigta.

### **CAAWIYE TELEFOON 0203 16116**

Heeganka isniin - talaado 13 - 21 iyo arbaco - jimco 17 - 21. Telefoonkan waxaad ka heleysaa

talooyin iyo hakis ku saabsan arimaha dembiyada.

### **TALASIIN SHARCIYAQAAN 0203 16117**

Heeganka isniinta - khamiista 17 - 19. Telefoonka talasiinta, waxaad ka hubin kartaa xaquuqdaada sharci ee aad leedahay iyo inaad heshid hakis la xiriirta arintaas.

### **WWW.RIKUNET.FI**

Rikunet waa adeeg internetka oo amaan ah. Kaas oo aad ku soo diri kartid su aalahaaga la xiriira dembiga, waxaadna heleysaa jawaabtooda iyagoo qoraal ah.

### **RIKUMOBILI 18184**

Rikumobili waa adeeg fariin. U dir fariin "RIKU" numbarka 18184, dabadeed halkaas ayaad ka bilaabeysaa. Ku xafid numbarka xasuus hayaha.

### **FACEBOOK**

RIKU waxaad ka heleysaa hada facebuuga. La xiriir maamulaha beejka [tiina.rantanen@riku.fi](mailto:tiina.rantanen@riku.fi), hadii aad heysid wax wargelin ah uu ku saabsan arinta. Baro oo ka mid noqo dadka ka hela!

### **www.riku.fi**

RIKU beejkeeda internetka waxaad ka helaysaa warar dheeri ah. Hakis, talooyin iyo macluumaad kale oo ku qoran luuqado badan.

### **Xaalada waxqabadka**

RIKU wuxuu leeyahay xafiis dhexe, 7 xafiis gobol iyo 29 goob adeeg. Shaqaaluhu tiradoodu waa 20 mushaar qaata, oo xirfadlayaal ah iyo in ka badan 300 oo loo doortay, loona tababaray shaqada, kuna shaqeeya iskaa wax u qabso. RIKU waxaa dhinaca maalgelinta ugu muhiimsan siiya ururka khammaarka (RAY) iyo dowlada.

Waxqabadka RIKU waxaa iska kaashada ururka gargaarka guryaha, ururka xuquuqda carruurta ee mannerheimi, ururka finishka ee cudurada maskaxda, laanqeyrta cas, ururka dumarka, iyo maamulka kaniisada, ururka finland ee deegaankuna weey hagaan.